

# QARAARKA CARRUURTA

Qoraal ku saabsan  
qaraarka xuquuqda  
carruurta



Halkaan waxaad ka heleysaa qoraalka wakiilka gaarka ah ee carruurta oo ku saabsan Qaraarka xuquuqda carruurta oo loogu talagalay loona turjumay carruurta dalalkooda ka qaxday.

Thomas Hammarberg ayaa qoray qoraalkii ugu horreeyey. Lena Erika Falk oo ka hawlgasha xarunta qoraalada afka fudud ayaa qortay qoraalkaan ku qoran afka ama luuqadda fudud.

Waxaad ka soo degsan kartaa Bartaan internet ee Wakiilka gaarka ah ee carruurta:  
[www.barnombudsmannen.se](http://www.barnombudsmannen.se)

Wakiilka gaarka ah ee carruurta  
Adareeska: Box 22106,  
104 22 Stockholm  
Telefoon: 08-692 29 50

Soosaarka: Barnombudsmannen  
Naqshadda iyo habeynta: Caroline Roberts  
Daabacaadda: Ineko AB  
ISBN 978-91-87448-90-4

# QARAARKA CARRUURTA

Qoraal ku saabsan  
qaraarka xuquuqda  
carruurta



# Alla barn har egna mänskliga rättigheter

Känner du till barnkonventionen? Det är regler som ska skydda barnets rättigheter.

Barnkonventionens rättigheter ska gälla för alla barn i alla länder. Det spelar ingen roll om du är född i ett land, om du har flytt eller flyttat dit. Du har samma rättigheter.

Du som barn har egna särskilda mänskliga rättigheter.

I Sverige räknas du som barn tills du har fyllt 18 år.

Det betyder att du har rätt till skydd och omsorg. Men också att du har rätt att få göra din röst hörd i frågor som handlar om dig och ditt liv.

Barnkonventionen säger att det är regeringen i varje land som ska skydda barnet och ta ansvar för att barnet får sina rättigheter. Den regering som skriver på en konvention lovar att följa reglerna.

Många länder är fattiga. De har inte pengar till att ge barn olika rättigheter. Men det står i reglerna att de ska göra allt vad de kan.

Regeringar kan också be andra länder om hjälp. Det står i reglerna att länder ska samarbeta för barnets rättigheter.

Det finns olika sorters mänskliga rättigheter. FN har flera olika konventioner om mänskliga rättigheter.

En form av rättighet är att alla människor ska få säga vad de tycker och vara med i föreningar.

## Dhammaan carruurtu waxay leeyihiin xuquuq aadaninimo

Wax ma ka taqaan qaraarka carruurta? Waa xeerar ilaaliya xuquuqda carruurta.

Qaraarka carruurtu wuxuu khuseeyaa dhammaan carrurta ku kala nool dalalka dunida. Taasina kuma xirna dalka aad ku dhalatay, haddii aad ka guurtay ama dalka aad u guurtay. Waxaad leedahay xuquuq isku mid ah.

Carruur ahaan waxaad leedahay xuquuq aadami oo gaar ah. Iswiidhen waxaa ka carruur ilaa aad ka buuxsato 18 sano.

Taasi waxay la micne tahay inaad xaq u leedahay badbaado iyo xannaano. Waxaad kaloo xaq u leedahay inaad ka hadasho arrimaha khuseeya shakhsiyaddaada iyo naftaada.

Qaraarka carruurtu wuxuu qorayaa in dowladda dal waliba ay badbaadiso carruurta oo ay mas'uuliyad ka qaaddo sidii ay xuquuqdooda u heli lahaayeen. Dowladdii saxiixda qaraarka waxay ballanqaadeysaa in ay raaceysyo xeerarka ku qoran.

Dalal badan ayaa fakhri ah. Ma haystaan lacag ku filan oo ay carruurta ku siiyaan xuquuqo kala duwan. Wuxaase xeerarka ku qoran in ay sameeyaan wax walba oo ay awoodaan.

Dowladuhu waxay caawimaad weyddisan karaa waddamada kale. Waxaa xeerarka ku qoran in ay waddamadu iska kaashadaan xuquuqda carruurta.

Waxaa jira noocyoo badan oo ka mid ah xuquuqda aadanaha. Qaramada Midoobey (QM) waxay dejisey qaraaro kala duwan oo ku saabsan xuquuqda aadanaha.

En annan form av rättighet är att människor ska få äta sig mätta och lära sig att läsa och skriva.

I konventionen om barnets rättigheter finns alla sorters rättigheter med. Alla sorters rättigheter är lika viktiga.

## Nästan alla länder har skrivit på

Arbetet med konventionen om barnets rättigheter började 1979. 1989 var barnkonventionen klar.

Nu har nästan alla länder skrivit på konventionen. Ländernas regeringar lovar att följa reglerna.

FN har flera olika konventioner om mänskliga rättigheter. Men ingen annan konvention har fått så stort stöd av världens länder som barnkonventionen.

Varför? Det beror på flera olika saker.

Människor har mer och mer läst och sett i tv hur krig, fattigdom och orättvisor drabbar barn. Många föreningar har talat om för politiker hur barn har det.

Fler och fler politiker har förstått att det är viktigt med barnets rättigheter.



Mid ka mid ah xuquuqahaas ayaa ah in dhammaan dadku ay sheegi karaan sida ay wax u arkaan oo ay urur ay doonaan xubin ka noqon karaan.

Mid kale oo ka mid ah xuquuqahaas ayaa ah in dadka oo dhammi ay helaan cunto ku filan iyo in ay bartaan wax-qorista iyo akhriska.

Qaraarka xuquuqda carruurta waxaa ku jira dhamman noocyada xuquuqda. Dhammaan noocyadaas xuquuqdu isku si ayey muhiim u yihiin.

## **In ku dhow dhammaan dalalka oo dhan ayaa saxiixay**

Hawsha qaraarka xuquuqda carruurtu wuxuu bilowday sannadkii 1979. Sannadkii 1989 ayaana qaraarka carruurta la dhammaystiray.

Hadda waxaa qaraarkaas saxiixay in ku dhow dhammaan dalalka dunida. Dowladaha dalalkuna waxay ballanqaadeen in ay raacayaan xeerarkaas.

QM waxay soo saartay qaraaro badan oo ku saabsan xuquuqda aadanaha. Laakiin ma jiro qaraar dalalka oo dhan ka helay taageerada uu qaraarka carruurtu helay.

Maxaa u sabab ah? Waxaa u sabab waxyaabo kala duwan.

Dadku waxay wax badan ka akhristeen oo telefishada ka arkeen sida dagaalada, saboolnimada iyo caddaalad-darradu u saameyso carruurta. Ururo badan ayaa dowladaha kala hadla sida ay tahay xaaladaha carruurtu.

Waxaa soo kordhayey siyaasiinta fahantay in ay muhiim tahay xuquuqda carruurtu.

# Viktiga regler

De olika reglerna i konventionen om barnets rättigheter kallas för artiklar. Det finns 54 olika artiklar.

Alla regler är lika viktiga. Men det är ändå några artiklar som är bra att läsa först och att komma ihåg.

I artiklarna 2, 3, 6 och 12 finns viktiga regler.

När du läser de andra artiklarna ska du tänka på vad som står i de här artiklarna.

**Artikel 2** handlar om att reglerna gäller för alla barn.

Alla barn är lika mycket värdar. Inga barn får bli diskriminerade, det vill säga bli sämre behandlade.

Det har ingen betydelse vilken färg barnet och barnets föräldrar har på huden, om barnet är flicka eller pojke, vilket språk barnet talar, vilken gud barnet tror på, om barnet har en funktionsnedsättning eller om barnet är rikt eller fattigt.

Mobbning i skolan kan till exempel vara diskriminering.

**Artikel 3** handlar om barnets bästa. Politiker, myndigheter och domstolar ska alltid tänka på vad som är bäst för barn när de bestämmer sådant som gäller barn.

I artikeln står det att barnets bästa ska komma i främsta rummet. Det betyder att det ibland finns saker som är viktigare än barnets bästa.

Men politikerna måste alltid kunna visa att de också har tänkt på barnen.

## Xeerar muhiim ah

Xeerarka kala duwan oo ku qoran qaraarka xuquuqda carruurta waxaa lagu magacaabaa qodobbo. Waxaa jira 54 qodob oo kala duwan.

Dhammaan xeerarkaasi isku si ayey muhiim u yihiin. Laakiin waxaa jira dhawr qdob oo ay wanaagsan tahay in la akhristo oo la xasuusnaado.

Qodobada 2, 3, 6 iyo 12 waxaa ku qoran xeerar muhiim ah. Marka aad akhrineyso qodobada kale waxaa maskaxdaada ku soo dhacaya waxa ku qoran qodobadaan.

**Qodobka 2** wuxuu ka hadlayaa in xeerarku ay khuseeyaan dhammaan carruurta.

Dhammaan carruurtu waxay leeyihiin qiime isku mid ah. Marnaba waa inaan ilmo la takoorin oo micneheedu yahay inaan loo la dhaqmin si ka xun sida loo la dhaqmo carruurta kale.

Micne ma sameyneso midabka ilmuu leeyahay ama waalidkiis leeyahay, haddii ilmahaasi yahay wiil ama gabar, luuqadda uu ku hadlo, ilaaha uu aamminsan yahay, haddii ilmahaasi naafu yahay ama haddii ilmahaasi taajir yahay ama sabool yahay.

Kadeedka carruurta loogu iskooladu wuxuu tusaale ahaan noqon karaa takoorid ama cunsuriyadeyn.

**Qodobka 3** wuxuu ka hadlayaa waxa carruurta u wanaagsan. Siyaasiinta, hay'adaha iyo maxkamaduhu waa in ay mar walba oo ay go'aanka ka gaarayaan arrin carruurta khuseysa ay xasuusnaadaan waxa carruurta u wanaagsan.

Qodobkaan waxaa ku qoran in waxa carruurta u wanaagsan

**Artikel 6** handlar om att barnet har rätt till liv och utveckling.

Rätt till liv betyder att länderna ska se till att barn inte blir dödade. Det kan vara både att barn inte blir dödade i krig och att barn får vård och mediciner när de är sjuka så att de inte dör av sjukdomar.

Rätt till utveckling betyder att länderna ska göra vad de kan för att ge barn en bra barndom.

Barn behöver många saker för att utvecklas bra. Det kan vara trygghet, kärlek, mat, sjukvård, ett hem, möjlighet att leka och att gå i skolan.

**Artikel 12** handlar om att barnet har rätt att säga hur det vill ha det. Vuxna ska lyssna på barn.

Myndigheter och domstolar ska fråga barnet vad det tycker och lyssna på barnet när de bestämmer saker som gäller barnet.

Det kan vara att lärarna i skolan frågar barnen vad de tycker innan de bestämmer saker.

Politiker i en kommun ska fråga barn vad de tycker innan de bestämmer om sånt som berör barn.



la siiyo ahmiyadda koowaad. Taasi waxay la micne tahay in ay mararka qaarkood jiri karaan wax ka muhiimsan wixa carruurta u wanaagsan.

Laakiin siyaasiintu waa in mar walba muujiyaan iyaguna ka fekerayaan carruurta.

**Qodobka 6** wuxuu ka hadlayaa in ilmuu xaq u leeyahay nolol iyo horumar.

Xaqa noloshu wuxuu la micne yahay in dalalku ay sugaan in aan ilmaha la dilin. Taasi waxay nowon kartaa in ilmaha aan lagu dilay dagaal oo la siiyo daryeel iyo daaweyn marka ay xanuunsadaan si aysan cudur ugu dhiman.

Xaqa horumarku wuxuu la micne yahay in dalalki ay sameeyaan wax walba oo ay awoodaan si carruurta u siiyan carruurnimo wanaagsan.

Carruurtu waxay u baahan tahay waxyaabo badan oo ay si wanaagsan ugu koraan. Waxaa ka mid noqon kara ammaan, jacayl, cunto, daryeel caafimaad, guri ama hoy, fursad ay ku cayaaraan iyo in ay iskoolka bilaabaan.

**Qodobka 12** wuxuu ka hadlayaa in ilmuu xaq u leeyahay in sheego wixii uu doono. Dadka waaweynina waa in dhegeystaan carruurta.

Hay'adaha iyo maxkamaduhu waa in ay carruurta weyddiyaan si ay wax u arkaan oo ay dhegeystaan marka ay go'aan ka gaarayaan wax carruurta khuseeya.

Waxaa ka mid noqon kara in macallimiinta iskooladu ay carruurta weyddiyyaan fikirkooda inta aysan go'aan gaarin.

Siyaasiinta degmadu waa in ay carruurta weyddiyyaan fikirkooda inta aysan go'aan ka gaarin wax carruurta khuseeya.

# **De andra artiklarna i konventionen om barnets rättigheter**

**Artikel 1** handlar om vem som är barn. Alla människor under 18 år är barn.

**Artikel 4** handlar om hur länderna ska göra för att följa reglerna i konventionen. Länderna ska ändra sina lagar så att lagarna blir bra för barn.

Länderna ska göra allt de kan för att ge barn rättigheter.  
Rika länder ska hjälpa fattiga länder.

**Artikel 5** handlar om att länderna måste förstå att det är föräldrarna som har ansvar för barnet. Föräldrarna ska hjälpa barnet så att det får sina rättigheter.

**Artikel 7 och 8** handlar om att alla barn har rätt att veta vem han eller hon är.

Barnet har rätt till ett namn och till att vara medborgare i ett land. Barnet har också rätt att veta vilka som är barnets föräldrar.

**Artikel 9** handlar om att barn alltid, när det går, ska få vara hos sina föräldrar.

Om föräldrarna skiljer sig har barnet rätt att träffa både mamma och pappa. Men ibland är det bäst för barnet att inte bo hos föräldrarna.

Och ibland är det bäst för barnet att inte träffa den ena föräldern. Det kan vara om föräldrarna slår barnet eller inte kan ta hand om sitt barn.

# **Qodobada kale oo ku jira qaraarka xuquuqda carruurta**

**Qodobka 1** wuxuu ka hadlayaa cidda carruur noqon karta. Dhammaan dadka da'doodu ka yar tahay 18 sano waa carruur.

**Qodobka 4** wuxuu ka hadlayaa sida dalalku u raacayaan xeerarka qaraarka. Dalalku waa in wax ka beddelaan sharchiyadooda si u noqdaan kuwo u wanaagsan carruurta. Dalalku waa in ay sameeyaan wax walba oo ay xuquuq ku siiyaan carruurta. Dalalka hodanka ahi waa in ay caawinaan dalalka saboolka ah.

**Qodobka 5** wuxuu ka hdlayaa in dalalku ay fahmaan in ay tahay waalidka cidda mas'uulka ka ah carruurta. Waalidku waa in ay carruurta ka caawinaan sidii ku heli lahaayeen xuquuqdooda.

**Qodobada 7 iyo 8** waxay ka hadlayaan in dhammaan carruurtu ay xaq u leeyihii in ay ogaadaan qof ay yihiin. Carruurtu waxay xaq u leeyihii in magac la siiyo iyo in ay muwaadin ka noqdaan dal. Carruurtu waxay kaloo xaq u leeyihii in ay ogaadaan cidda waalidka u ah.

**Qodobka 9** wuxuu ka hadlayaa in carruurtu mar walba oo ay suurtagal tahay la joogaan waalidkood. Haddii ay labada waalidka isfuraan, wuxuu ilmuu xaq u leeyahay in uu la kulmo aabbaha iyo hooyadaba. Laakiin mararka qaarkood waxaa ilmaha u wanaagsanaan karta in uusan la nooleyn waalidkiis. Mararka qaarkoodna waxaa ilmaha u wanaagsanaan kara in uusan la kulmin waalidka midkood. Waxay noqon kartaa waalidku ilmaha garaaco ama uusan xannaaneyn.

**Artikel 10 och 11** handlar om att barn och föräldrar har rätt att träffa varandra även om de bor i olika länder.

En förälder får inte flytta till ett annat land med barnen utan att den andra föräldern vill det.

Länderna ska komma överens om hur de ska hjälpa barn och föräldrar så att de kan träffas.

**Artikel 13, 14 och 15** handlar om att barnet har rätt att säga vad det tycker.

Barnet har rätt att tänka fritt, att tro på vilken gud det vill och att vara med i olika föreningar.

**Artikel 16** handlar om att barnet har rätt till privatliv.

Det kan till exempel vara att föräldrar inte ska läsa sina barns brev och dagböcker. Det kan också vara att barnet ska kunna stänga en dörr och få vara i fred när det går på toaletten i skolan.

**Artikel 17** handlar om att barnet har rätt att läsa bra tidningar och böcker och få information på annat sätt, till exempel radio, tv och internet.

Länderna ska ha lagar som skyddar barnet mot filmer och texter som kan skada barnet.

**Artikel 18** handlar om att det är föräldrarna som tillsammans har ansvaret för barnet.

Föräldrar ska alltid tänka på vad som är bäst för barnet. Länderna ska hjälpa föräldrarna så att de kan vara bra föräldrar. Ett sätt att hjälpa föräldrarna är att det finns bra förskola där barn kan vara när föräldrarna arbetar.

**Qodobada 10 iyo 11** waxay ka hadlayaan in carruurta iyo waalidkuba ay xaq u leeyihiin in ay kulmaan xataa haddii ay ku kala nool yihiin dalal kala duwan.

Waalidna carruurta u lama guuri karo dal kale iyadoo uusan waalidka kale oggolaan.

Dalalku waa in ay ku heshiyaan sidii ay u caawini lahaayeen in waalidka iyo carruurtu isla kulmaan.

**Qodobada 13, 14 iyo 15** waxay ka hadlayaan in carruurtu xaq u leedahay in ay fikirkooda dhiibtaan.

Carruurtu waxay xaq u leeyihiin in ay si xor ah ku fekeraan, in ay aamminaan ilaahii ay doonaan iyo in ay xubin ka noqdaan ururkii ay doonaan.

**Qodobka 16** wuxuu ka hadlayaa in carruurtu xaq u leedahay nolol u gaar ah.

Waxaa ka mid noqon kara in aysan waalidku akhrisan karin warqadaha iyo xasuuusqorka carruurta. Waxaa kaloo ka mid noqon kara in ilmuu albaabka xirto oo aan loogu soo gelin marka uu musquusha iskoolka ku jiro.

**Qodobka 17** wuxuu ka hadlayaa in carruurtu xaq u leedahay in ay akhristaan wargeysyo iyo buugaag wanaagsan oo ay wararka siyaabo kale ku helaan, sida raadiyaha, telefishanka iyo internetka.

Dalalku waa in leeyihiin sharchiyo carruurta ka badbaadiya filimada iyo qoraalada naftooda dhaawaci kara.

**Qodobka 18** wuxuu ka hadlayaa in labada waalid ay wadajir mas'uul uga yihiin carruurta.

Waalidku waa in ay mar walba ku fekeraan waxa u wanaagsan

**Artikel 19** handlar om att skydda barn mot våld hemma.

Länderna ska skydda barn mot föräldrar och andra vuxna som slår barnet, är elaka mot barnet, eller tar hand om barnet dåligt på något annat sätt.

Det kan vara att föräldrarna missbrukar alkohol eller narkotika eller att föräldrarna utnyttjar barnet sexuellt.

**Artikel 20 och 21** handlar om barn som inte kan bo hemma hos sin familj.


Länderna ska se till att barnet får bo i en annan familj. Det bästa är om barnet får bo hos släktingar. Ibland kan ett barn adopteras av en familj i ett annat land.

Myndigheter och domstolar som bestämmer var barn ska bo ska alltid tänka på barnets bästa.

**Artikel 22** handlar om barn som är flyktingar. Länderna lovar att ge barn som kommer till landet skydd och hjälp.

Det gäller både barn som kommer ensamma och barn som kommer med sina föräldrar.

Ett ensamt barn ska få hjälp att hitta sina föräldrar. Om man inte kan hitta föräldrarna eller andra släktingar ska barnet få samma skydd och hjälp som andra barn får när de inte kan bo hos sina föräldrar.



carruurta. Dalalku waa in ay waalidka ka caawinaan sidii ay noqon lahaayeen waalid wanaagsan.

Hab lagu caawini karo waalidka ayaa ah in uu jiro dugsi barbaarin oo wanaagsan oo carruurtu joogto inta waalidku ku maqan yahay shaqada.

**Qodobka 19** wuxuu ka hadlayaa in carruurta laga badbaadiyo guriga jirdil ka jiro.

Dalalku waa in ay carruurta ka badbaadiyaan waalidka iyo dadka kale oo garaaca ama sida xun u la dhaqma ama si uun u dayaca xannaaneyntooda.

Taasi waxay ku iman kartaa in waalidku uu si xun u isticmaalo khamriga ama maandooriyayaal ama waalidku faraxumeeyo carruurta.

**Qodobada 20 iyo 21** wuxuu ka hadlayaa carruurta aan ku noolaan karin guriga reerka.

Dalalku waa in ay ku dadaalaan in ilmaha guri kale la dejyo. Waxaa ugu wanaagsan haddii ay jiraan qaraabo uu ilmuu la noolaan karo. Mararka qaarkood waxaa dhici kara in qoys dal kale ku nool ay dal kale ka soo wataan ilmo ay korsadaan.

Hay'ada iyo maxkamadaha go'aaminaya meesha carruurtu ku noolaaneyso waa in mar walba ka fekeraan waxa carruurta u wanaagsan.

**Qodobka 22** wuxuu ka hadlayaa carruur qaxooti ah. Dalalku waxay ballanqaadayaan in carruurta dalalkooda timaadda ay siiyan badbaado iyo caawimaad.

Taasi waxay khuseysaa carruurta keligood yimaada iyo kuwa la socda waalidkood.

Ilmo keligiis yimid waa in laga caawinaa sidii uu u heli lahaa

**Artikel 23** handlar om barn med funktionsnedsättning.

Länderna ska se till att barn med funktionsnedsättning får bra liv. Barn med funktionsnedsättning ska kunna gå i skolan och vara med i samhället på andra sätt.

Barnet och barnets familj ska få den hjälp de behöver. Hjälpen ska vara gratis eller så billig att mäniskor har råd att ta emot hjälp.

Länder ska tillsammans lära sig mer om hur de kan hjälpa barn med funktionsnedsättning på bra sätt.

Rika länder ska hjälpa fattiga länder.

**Artikel 24** handlar om barnets rätt till hälsovård och sjukvård.

Länderna lovar att göra allt de kan för att barn ska få bra hälsa.

Alla barn har rätt att få vård när de är sjuka. Kvinnor som

väntar barn och mammor med nyfödda barn ska få bra vård.

Föräldrar ska få lära sig hur de ska mata och vårda sitt barn.

Rika länder ska hjälpa fattiga länder.

**Artikel 25** handlar om barn som inte bor hemma hos sina

föräldrar.

Den myndighet som har ansvar för barnet ska se till att barnet får bra omvärdnad eller behandling.

**Artikel 26 och 27** handlar om barnets rätt till trygghet.

Familjer ska få hjälp så att barnet har det bra även om föräldrarna är fattiga, sjuka eller arbetslösa.

En förälder som inte bor med barnet ska också ta ansvar för sitt barn. Det kan vara att betala så att barnet får mat, kläder, bostad och annat som barnet behöver.

waalidkiis. Haddii ay la heli waayo waalidka ama qaraabo kale, waa in kolkaas carruurtaas la siiyaa badbaado iyo caawimaad u dhiganta tan siijo carruurta aan la noolaan karin waalidkood.

**Qodobka 23** wuxuu ka hadlayaa carruurta naafada ah.

Dalalku waa in ay ku dadaalaan sidii ay carruurta naafada ahi u heli lahayd nolol wanaagsan.

Carruurta naafada qabtaa waa in ay dhigtaan iskoolka oo ay siyaabo kala duwan uga qaybnoqdaan bulshada.

Carruurta iyo waalidkood waa in ay helaan caawimaadda ay u baahan yihiin. Caawimaaddasi waa in ay noqotaa mid lacag la'aan ama qiime jaban oo ay dadka awoodaan si ay u helaan caawimaaddas.

Dalalku waa in ay wadajir u kororsadaan aqoon ku saabsan sidii ay si wanaagsan ugu caawini lahaayeen carruurta naafada qabta.

Dalalka hodanka ahi waa in ay caawinaan dalalka saboolka ah.

**Qodobka 24** wuxuu hadlayaa xuquuqda carruurtu u leedahay daryeelka caafimaad iyo daaweyn.

Dalalku waxay ballanqaadayaan in ay sameynayaan wax walba si ay carruurtu u hesho caafimaad wanaagsn.

Dhammaan carruurta waxay xaq u leeyihii in la daaweeyo marka ay bukoodaan. Haweenka uurka iyo kuwa dhowaan ummulay waa in la siiyaa daryeel caafimaad oo wanaagsan.

Waalidka waa la baraa sida ay carruurta cunto u siinlahaayeen iyo sida ay u xannaaneyn lahaayeen.

Dalalka hodanka ahi waa in ay caawinaan dalalka saboolka ah.

**Qodobka 25** wuxuu ka hadlayaa carruurta aan ku noolaan karin guriga waalidkood.

**Artikel 28** handlar om barnets rätt att gå i skolan.

Alla barn ska gå i grundskolan. Det ska vara gratis. Länderna ska se till att fler barn får gå i gymnasiet och annan högre utbildning.

Rika länder ska hjälpa fattiga länder.

**Artikel 29** handlar om vad barnet ska lära sig i skolan.

Varje barn ska få utvecklas så mycket det går. Barnet ska vara väl förberett för sitt liv som vuxen.

Barnet ska lära sig om mänskliga rättigheter och att alla människor är lika mycket värda.

Barnet ska också lära sig att vara rädd om naturen.

**Artikel 30** handlar om barn som tillhör minoriteter eller ursprungsfolk.

I Sverige finns barn som är samer, sverigefinnar, tornedalingar, romer och judar. De har rätt till sitt språk, sin kultur och sin religion.



Hay'adaha mas'uulka ka ah carruurtu waa in ay hubiyaan in carruurtu heshay xannaano iyo daaweyn.

**Qodobada 26 iyo 27** waxay ka hadlayaan xuquuqda carruurtu u leedahay ammaan.

Waa qoysaska la caawinaa in carruurtu u hesho nolol wanaagsan xataa haddii qoysku sabool yahay ama bukaan yahay ama uu shaqala'aan yahay.

Waaliidka aan ilmaha la nooleyni waa in uu isagoo gutaa mas'uuliyadda ka saaran. Waxaa ka mid noqon kara in uu lacag bixiyo si uu ilmuuhu u helo cunto, dhar, guri ama waxyaalo kale oo uu u baahnaan karo.

**Qodobka 28** wuxuu ka hadlayaa xuquuqda carruurtu u leedhaya in ay dhigtaan iskoolka.

Dhammaan carruurtu waa in ay dhigtaan dugsiga hoose. Dugsigaasina waa lacag la'aan. Dalalku waa in ay ku dadaalaan in carruur badani bilaabaan dugsiga sare iyo waxbarasho sare. Dalalka hodanka ahi waa in ay caawinaan dalalka saboolka ah.

**Qodobka 29** wuxuu ka hadlayaa waxa carruurtu ka baraneyso iskoolada ama dugsiyada.

Ilmo waliba waa in uu horumar u sameeyaa sida ugu suurtagalka badan. Carruurta waa in loo diyaariyaa nolosha marka ay weynaadaan.

Carruurtu waa in ay bartaan xuquuqda aadanaha iyo in dadka leeyahay qiime isku mid ah.

Carruurtu waa in ay sidoo kale bartaan ilaalinta dabeeecadda.

**Qodobka 30** wuxuu ka hadlayaa carruurta ka dhalatay dadka laga tiro badan yahay ama dadyowga asaliga ah.

Iswiidhen waxaa ku nool carruur u dhalatay saamerkaa,

**Artikel 31** handlar om att barnet har rätt till lek, vila och fritid.

**Artikel 32** handlar om att skydda barnet mot farligt arbete.

**Artikel 33** handlar om att skydda barnet mot narkotika.

**Artikel 34** handlar om att skydda barnet mot att vuxna tvingar dem till sex eller att barnet tvingas att sälja sex.

**Artikel 35 och 36** handlar om att skydda barnet mot att bli utnyttjat på något annat sätt.

Det kan vara att någon säljer ett barn för att barnet ska arbeta i en fabrik. Det kan vara att någon tar ett barn från föräldrarna för att sälja barnet till en annan familj.

Men det är också ett skydd mot alla andra sätt att utnyttja barn som någon kan komma på.

**Artikel 37** handlar om att skydda barnet mot dödsstraff, livstids fängelse och tortyr.

Tortyr är när man plågar en person för att den ska berätta något.

När det är en rättegång mot ett barn har barnet rätt att få hjälp av en jurist, en person som har kunskap om lagar. Barn som sitter i fängelse får inte bli dåligt behandlade.

Barn ska inte vara i samma fängelse som vuxna. Barn som sitter i fängelse ska kunna få besök av sin familj och brevväxla med sin familj.

**Artikel 38** handlar om att barn inte ska vara soldater.



fiinishka Iswiidhen, luuqad looga hadlo waqooyiga Iswiidhen, yuhuudda iyo romiga. Waxay dadyowgaasi xaq u leeyihiin luuqaddooda, dhaqankooda iyo diintooda.

**Qodobkja 31** wuxuu ka hadlayaa in carruurtu xaq u leedahay cayaar, nasashao iyo waqtii firaaco.

**Qodobka 32** wuxuu ka hadlayaa in carruurta laga badbaadiyo shaqooyin naftooda khatar ku ah.

**Qodonka 33** wuxuu ka hadlayaa in carruurta laga badbaadiyo daroogada.

**Qodobka 34** wuxuu ka hadlayaa in carruurta laga badbaadiyo dadka waaweyn oo ku khasba galmo ama in ay jirkooda iibiyaa.

**Qodobada 35 iyo 36** wuxuu ka hadlayaa in carruurta laga badbaadiyo in siyaabo kale loo isticmaalo.

Waxaa ka mid noqon karaa in qof iibiyio ilmo yar si uu ilmahaasi uga shaqeeyo wershad. Waxay kaloo noqon kartaa in qof ilmaha ka qaato waalidkiis si uu uga iibiyio qoyska. Laakiin waxaa kaloo carruurta laga badbaadinayaa dhammaan siyaabaha kale oo carruurta loo isticmaali karo.

**Qodobka 37** wuxuu ka hadlayaa in carruurta laga badbaadiyo xukun dil ah, xabsi daayin iyo jirdil.

Jirdilku waa marka qof la silciyo si uu u sheego war laga rabay. Marka ilmo la horkeeno maxkamad wuxuu ilmahaasi xaq u leeyahay in uu caawimaad ka helo garyaqaan, qof aqoon u leh sharchiyada. Ilmaha xabsiga ku jira waa in aan loo la dhaqmin hab aan wanaagsanayn.

**Artikel 39** handlar om att länderna ska hjälpa barn som har blivit utnyttjade så att barnet kan få bra och leva ett vanligt liv. Det kan vara barn som har varit soldater i krig.

**Artikel 40** handlar om barn som är misstänkta för något brott. Länderna lovar att behandla barnet bra och att ge barnet en rättvis rättegång.

**Artikel 41** handlar om att länderna gärna får göra mer än det som står i konventionen för att ge barnet rättigheter.

**Artikel 42** handlar om att länderna lovar att se till att både barn och vuxna vet vilka regler som finns i barnkonventionen.

**Artiklarna 43–54** är regler för hur länderna ska göra för att följa barnkonventionen.



Carruurta waa in aan lagu xirin xabsiyada ay ku xiran yihiin dadka waaweyni. Carruurta xabsiga ku jirta waa in waalidkood soobooqdaa oo waraaqo ku la xiriiraan reerkooda

**Qodobka 38** wuxuu ka hadlayaa in aan carruurta la qori karin askar.

**Qodobka 39** wuxuu ka hadlayaa in dalalku ay caawinaan carruurta la isticmaalay si carruurtaasi u helaan caafimaad iyo nolol wanaagsan oo caadi ah.

Waxay noqon karaan carruur dagaal ka soo dagaalantay askar ahaan.

**Qodobka 40** wuxuu ka hadlayaa carruurta lagu tuhmo falal dembi ah. Dalalku waxay ballanqaadayaan in carruurta si wanaagsan loo la dhaqmo iyo in carruurta la horgeeyo maxkamad caddaalad ah.

**Qodobka 41** wuxuu ka hadlayaa in dalalku ay sameeyaan in ka badan qodobada qaraarka xuquuqda carruurta si ay carruurtu u hesho xuquuqdooda.

**Qodonka 42** wuxuu ka hadlayaa in dalalku ay ballanqaadayaan in carruurta iyo dadka waaweynba lagu wacyi-geliyo xeerarka ku qoran qaraarka carruurta.

**Qodobada 43–54** waa xeerar ku saabsan waxa ay dalalku sameynayaan si y u raacaan qaraarka carruurta.

## **FN:s barnrättskommitté**

I FN:s hus i staden Genève i Schweiz arbetar en grupp människor som ska se till att länderna följer reglerna i barnkonventionen.

Det är FN:s barnrättskommitté. Länderna ska då och då lämna rapporter till barnrättskommittén.

Länderna lovar också att människor i landet ska få läsa rapporterna för att kunna diskutera vad som är bra och dåligt för barnen i landet.

I barnrättskommittén arbetar arton personer. De kommer från olika länder och alla är barnexperter. Experterna läser ländernas rapporter.

Ibland finns det flera rapporter från samma land. Föreningar som arbetar för barnets rättigheter kan göra egna rapporter om hur barn har det i landet.

Sedan har barnrättskommittén ett möte. Några personer som arbetar för landets regering kommer dit.

De får svara på frågor om vad de har gjort för barn och vad de tänker göra för att det ska bli bättre.

Barnrättskommittén är ingen domstol. Den kan inte straffa länder som låter bli att följa reglerna i barnkonventionen.



## Guddiga xuquuqda carruurta ee QM

Aqalka QM oo ku yaal magaalada Genève ee dalka Switzerland waxaa ka shaqeeya koox dad ah oo dusha ka eega in dalalku ay raaceen qaraarka carruurta.

Waa guddiga xuquuqda carruurta ee QM. Dalalku waxay hadba waqtii warbixino u soo gudbiyaan guddiga xuquuqda carruurta.

Dalalku waxay ballanqaadayaan in dadka dalalka ku nool ay akhristaan warbixintaas si looga doodo waxyaalaha carruurta u wanaagsan ama u xun dalalka gudahooda.

Shaqaalahaa guddiga xuquuqda carruurtu wuxuu ka kooban yahay siddeed iyo tobant qof. Waxay ka kala yimaadeen waddamo kala duwan oo dhammaantood waxay khibrad u leeyihii arrimaha carruurta. Khubaradaasi waxay u kuurgalaan warbixinaha waddamadu soo diyaariyaan.

Mararka qaarkood waxaa ku jiri kara dad badan oo isku dal ka yimid. Ururada ka shaqeeya xuquuqda carruurtu waxay soo diyaariyaan warbixino u gaar ah oo ku saabsan nolosha ay carruurtu ku haystaan dalkaas.

Intaas kadib wuxuu guddiga xuquuqda carruurtu isugu yimaadaa kulan. Dhawr qof oo ka socda dowladda dalkaas ayaa kulanka ka soo qaybgala.



Men barnrättskommittén kan ge förslag på vad länderna kan göra för att det ska bli bättre. Ibland kan länderna få hjälp av FN eller av andra länder.

Meningen är att barn ska få sina rättigheter.


## **FN:s barnrättskommitté arbetar på flera olika sätt**

Barnrättskommittén kan kalla en regering till ett möte när som helst. Det kan vara om FN får veta att barn blir mycket dåligt behandlade i ett land.

Kanske har något barn skrivit ett brev till barnrättskommittén och talat om vad som händer.

Barnrättskommittén kan ordna möten för att prata om särskilda problem.

Det har varit möten om barn i krig, barn som har farliga arbeten, flickors rättigheter och barn som sitter i rullstol eller har andra funktionsnedsättningar.



Waxay halkaas kaga jawaabaan su'aalo laga weyddiyo waxay carruurta u qabteen iyo waxa ay ku talajiraan inay sii hagaajiyan.

Guddiga xuquuqda carruurtu ma uusan aha maxkamad.

Awood uma leh in uu ciqaabo dalalka aan ku dhaqmin xeerarka qaraarka xuquuqda carruurta.

Laakiin wuxuu guddiga xuquuqda carruurtu soo jeedin karaa talooyin ku saabsan waxa dalalka looga baahan yahay in ay hagaajiyan. Mararka qaarkood waxay dalalkaasi caawimaad ka heli karaan Qaramada Midoobey ama dalalka kale.

Ujeeddaduna waa in carruurtu ay helaan xuquuqda ay leeyihiin.

## **Guddiga xuquuqda carruurtu ee QM waxay u shaqeeyaan habab kala duwan**

Guddiga xuquuqda carruurtu wuxuu markii uu doono kulan ugu yeeri karaa dowlad dal. Taasi waxay ku imaan kartaa haddii QM ay ka warhesho in uu jiro dal carruurtu si xun loo la dhaqmo.

Waxaa laga yaabaa in ilmo warqad u soo qoray guddiga xuquuqda carruurtu oo uu ka hadlay waxa dalkas ka dhacay.

Guddiga xuquuqda carruurtu wuxuu qabanqaabin karaa kulamo looga hadlo dhibaatooyin gaar ah.

Waxay la qabtay kulamo looga hadlay carruurta ku nool meelaha dagaaladu ka socdaan, carruuro ku hawllan shaqooyin halis ku ah naftooda, xuquuqda gabdhaha iyo carruurta curyaanka ah oo kursiga ku fadhiya ama qaba naafooyin kale.

## **Fler länder har börjat tänka på barns rättigheter**

Naturligtvis följer inte alla länder reglerna i barnkonventionen.

En del länder bryter mot många regler. I en del fattiga länder har barn farliga arbeten. Det är kanske så att flickor och barn med funktionsnedsättning inte får gå i skolan.

De flesta länder har svårt att följa alla regler. Också Sverige har fått kritik av barnrättskommittén.

Men politiker i många länder har börjat tänka mer på barns rättigheter när de bestämmer olika saker.

Flera länder har fått nya lagar som är bra för barn. I flera länder finns nu barnombudsmän som arbetar med att påminna de som bestämmer om barns rättigheter.

I Sverige finns Barnombudsmannen sedan år 1993.

Lärare och andra som arbetar med barn får lära sig om barnets rättigheter.

Nya föreningar har börjat arbeta för barnets rättigheter.

Bistårdsorganisationer tänker mer på vad som är bra för barn när de hjälper människor i fattiga länder.

De här sakerna har länder visat i sina rapporter till barnrättskommittén.

## **Dalal badan ayaa bilaabay in ay ka fekeraan xuquuqda carruurta**

Xaqiiqadu waxay tahay in dalalka oo dhammi aysan raacin xeerarka xuquuqda carruurta.

Dalal qaar ayaa jebiya xeerar badan oo qaraarkas ka mid ah. Dalalka saboolka ah qaarkood waxaa ka jira carruurta ka shaqaysa shaqooyin halis ah. Waxaa kaloo dhici kara in gabdhaha iyo carruurta naafada ah aan la siin waxbarasho dugsiyeed.

Dalalka badankood waxaa ku adag in ay raacaan xeerar oo dhan. Xataa Iswiidhen ayey dhaleecyn uga timid guddiga xuquuqda carruurta.

Laakiin siyaasiin dalal badan ayaa bilaabay in ay aad uga fekeraan xuquuqda carruurta mar walba oo ay go'aan ka gaarayaan arrimo kala duwan.

Dalal badan ayaa dejiyey sharchiyo cusub oo u wanaagsan carruurta. Waqtigaan hadda ah waxaa dalal badan waxaa ka jira wakiil gaar ah oo ka shaqeeya in dadka talada haya la xasuusiyo xuquuqda carruurta.

Iswiidhen waxaa ka jira wakiil gaar ah ee carruurta oo la asaasay sannadkii 1993. Macallimiinta iyo dadka kale oo carruurta la shaqeeya waxay bartaan xuquuqda carruurta.

Waxaa iyaguna bilowday ururo ka shaqeeya xuquuqda carruurta. Ururada kaalmada dibeddu waxay iyaguna aad uga fekeraan waxa u wanaagsan carruurta mar walba oo ay kaalmo u fidinayaan dadyowga dalalka saboolka ah.


Qoraalo arrimahaas ku saabsan ayey dalalku u soo gudbiyeen guddiga xuquuqda carruurta.

## Barnets rättigheter i framtiden

Barnkonventionen har funnits sedan 1989. Nästan alla länder har lovat att följa reglerna. De flesta länder har lämnat rapporter till barnrättskommittén.

Nu är det dags att se till att barnen verkligen får de rättigheter som finns i konventionen.

Därför är det viktigt att människor vet vilka regler som finns i konventionen. Då kan de börja diskutera hur det kan bli bättre för barn i Sverige och i andra länder.



## **Xuquuqda carruurta ee mustaqbalka**

Qaraarka xuquuqda carruurtu wuxuu soo jirey laga soo bilaabo 1989. In ku dhow dalalka oo dhan ayaa ballanqaaday in ay raacayaan xeerarkaas. Dalalka badankood waxay guddiga xuquuqda carruurta u soo gudbiyeen qoraalo.

Hadda waxaa la gaaray waqtigii la hubin lahaa in ay carruurtu dhab ahaan u helaan xuquuqda ku qoran qaraarka carruurta.

Sidaas awgeed ayey muhiim u tahay in ay dadku yaqaanniin xeerarka ku qoran qaraarka carruurta. Markaas ayey suurtagal noqoneysaa in laga wadaxaajoodo in la sii wanaajiyo xaaladda carruurta ku nool Iswiidhen iyo dalalka kale.

# **Hit kan du vända dig om du har frågor om dina rättigheter**

**Migrationsverket** är en myndighet som tar emot ansökningar från personer som vill komma till Sverige och utreder om de har tillräckliga skäl för att få stanna här. De kan svara på frågor om asylprocessen.

Telefon: 0771-235 235 måndag–fredag kl 08.00–16.00.

Om du ringer från utlandet: +46 771 235 235

**Inspektionen för vård och omsorg (IVO)** är en myndighet som kontrollerar att barn och unga som inte bor med sin familj har det bra där de är placerade.

Du kan berätta om det som inte fungerar bra på det boende där du är, i kontakt med socialtjänsten eller hälso- och sjukvården.

Telefon: 020-120 06 06 måndag–fredag kl 12.00–19.00.

**Skolinspektionen** är en myndighet som arbetar för att alla elever ska få en bra utbildning i en trygg miljö.

De kan svara på frågor om din rätt till utbildning. Du kan också anmäla när något inte fungerar som det ska i skolan.

Telefon: 08-527 332 00 måndag–fredag kl 9.30–15.00.

**Rädda Barnen** är en organisation som stöder barn i utsatta situationer – i Sverige och i världen. De har mottagningar för barn och ungdomar i Stockholm, Göteborg, Malmö och Umeå.

Telefon: 08-698 90 00 måndag–torsdag kl 8.30–17.00 och fredag kl 12.45–16.00.

## **Halkaan ayaad la xiriiri kartaa haddaad qabto su'aalo ku saabsan xuquuqda carruurta**

**Hay'adda Socdaalku** waa hay'adda qabata codsiyada ay soo gudbiyaan dadka doonaya inay Iswiidhen yimaadaan oo isla markaasna baarta haddii ay jiraan sababo ku filan oo ay dadkaasi dalka ku joogaan. Waxay ka warbixisaa su'aalaha la xiriira habka arrimaha magangelyadoonku u dhacaan.

Telefoon: 0771-235 235 isniin-jimce, saacadaha 08.00–16.00.  
Haddaad ka soo wacayso dalka dibeddiisa: +46 771 235 235

**Hay'adda kormeerka daryeelka iyo xannaanada (IVO)** waa hay'ad kormeer ku samaysa in carruurta iyo dhallinyarada aan la noolayn waalidkood ay wanaag kala kulmaan meelaha la dejyo.

Waxaad u sheegi kartaa haddii aysan wax waliba si wanaagsan u shaqayneyn meesha aad deggan tahay, ama xiriirka aad la yeelato xafiiska gargaarka bulshada ama rugaha daryeelka caafimaadka.

Telefoon: 020-120 06 06 isniin-jimce, saacadaha 12.00–19.00.

**Hay'adda kormeerka iskoolada** waa hay'ad ka shaqaysa in dhammaan ardaydu ay helaan waxbarasho wanaagsan oo ay ku bartaan bey'ad ammaan ah.

Waxay ka jawaabaan su'aalaha ku saabsan xaqa aad u leedahay waxbarasho. Wuxaad kaloo samayn kartaa inaad ka ashtakooto wixii aan iskoolka si wanaagsan uga shaqayneyn.  
Telefoon: 08-527 332 oo isniin-jimce, saacadaha 9.30–15.

**Save the Children helpline** är till för barn som kommer ensamma till Sverige.

Du kan ringa om vad som helst och du kan vara anonym.

Du kan prata arabiska, dari eller engelska. Samtalet kostar inget.

Telefon: 0200-77 88 20 varje dag kl 15.00–18.00.

**Rådgivningsbyrån för asylsökande och flyktingar (Sweref)** är en organisation som erbjuder kostnadsfri juridisk rådgivning.

De svarar på frågor om asyl, familjeåterförening, svenska medborgarskap och den svenska utlänningstagstiftningen.

Telefon: 0200-88 00 66 måndag–onsdag kl 9.00–11.00.

**Röda Korset** är en organisation som kan ge råd i enskilda flyktingärenden och hjälpa till att söka efter en saknad familjemedlem. Ta hjälp av en vuxen för att kontakta dem.

Telefon: 020-41 50 00 tisdag–torsdag kl 9.30–12.00.

**Bris** är en organisation som ger stöd till utsatta barn och unga.

Du som är under 18 år kan ringa och prata med en kurator om det du funderar mycket på eller behöver hjälp med.

Du kan vara anonym om du vill. Samtalet kostar inget.

Telefon: 116 111 måndag–söndag kl 14.00–21.00, onsdagar kl 17.00–21.00.

**Barnrättsbyrån** är en organisation som erbjuder enskilda barn och ungdomar i Stockholmsområdet praktisk och juridisk hjälp, stöd och rådgivning. Alla barn och unga upp till 21 år är välkomna att höra av sig med frågor om sin situation. Vi har en medarbetare som pratar persiska.

Telefon: 072 - 565 33 46 Mejl: [elin@barnrattsbyran.se](mailto:elin@barnrattsbyran.se)

Observera att de flesta har lunchstängt.

**Ururka Badbaada Carruurta** waa urur taageero u fidiya carruurta ku sugar xaalado khatar ah – Iswiidhen iyo dunida inteeda kaleba. Waxay qaabbilaad ay carruurta iyo dhallinyarada ku qaabbilaan ku leeyihin magaaloo yinka Stockholm, Göteborg, Malmö iyo Umeå.  
Telefoon: 08-698 90 00 isniin-khamiis, saacadaha 8.30–17.00 iyo jimce, saacadaha 12.45–16.00.

**Save the Children helpline** la shaqeeyaa carruurta keligood yimaada Iswiidhen.  
Markaad doonto ayaad waci kartaa adigoo qarsoodi ah.  
Waxaad kula hadli kartaan afafka Carabiga, Dari ama Ingiriiska. Telefoonkaasina waa lacag la'aan.  
Telefoon: 0200-77 88 20 maalin walba saacadaha 15.00–18.00.

**Xafiska talasiinta magangelyadoonka iyo qaxootiga (Sweref)** waa urur qaxootiga iyo magangelyadoonka ugu deeqa talasiin xagga sharciga oo lacag la'aan ah. Waxay ka jawaabaan su'aalaha la xiriira magangelyada, mideynta qoysaska, muwaadiniyadda Iswiidhen iyo sharciga shisheeyaha iswiidhishka.

Telefoon: 0200-88 00 66 isniin-arbaco, saacadaha 9.00–11.00.

**Laanqayrta Cas** waa urur laga heli karo talooyin ku saabsan arrimaha qaxootiga shakhsiyadka iyo in uu gacan ka geysto baafinta dadka qoysaska ka tirsan oo la waayo. Qof weyni ha ku caawino si aad u la xiriirto.

Telefoon: 020-41 50 00 isniin-khamiis, saacadaha 9.30–12.00.

**Xuquuqda carruurta ee bulshada dhexdeeda (Bris)** waa urur caawimaad siiya carruurta iyo dhallinyarada ku sugar xaalado khatar ah. Haddaad ka yar tahay 18 sano waxaad waci kartaa

oo kala hadli kartaa aqoonyahan lataliyeh ah arrimaha aad aad uga fekereyo caawimaadda aad u baahan tahay. Qarsoodi ayaad noqon kartaa haddii aad dooneysyo. Telefoonkaasina waa lacag la'aan.

Telefoon: 116 111 isniin-axad, saacadaha 14.00– 21.00, arbaco, saacadaha 17.00–21.00.

**Barnrättsbyrån (Xafiiska xuquuqda carruurta)** waa urur carruurta iyo dhallinyarada ku nool magaalada Stockholm iyo agagaarkeeda ugu deeqa caawimaad toos iyo mid xagga sharciga, iyo weliba gargaar iyo talasiin. Dhammaan carruurta iyo dhallinyarada da'doodu tahay ilaa 21 sano waxaa lagu soo dhoweynayaa in ay nala soo xiriiraan oo na weyddiyyaan wixii su'aalo ah oo ku saabsan xaaladdooda.

Telefoon: 072-565 33 46 E-mail: elin@barnrattsbyran.se

Xusuusnow in meelaha badankood xiran yihin saacadaha qadada.



## KU SAABSAN WAKIILKA GAARKA AH EE CARRUURTA

Iswiidhen waxaa ku nool 2 milyan oo carruur iyo dhallinyaro ah oo da'doodu ka yar tahay 18 sano. Sida dadka kale oo bulshada ka tirsan ayey go'aamada ay gaaraan dadka talada haya iyo hawladeenadu saameyn ugu yeelan kartaa noloshooda.

Dhammaan carruurta iyo dhallinyarada da'doodu ka yar 18 sano oo ku nool Iswiidhen waxay leedyihii qof wakiil ka ah. Qofka wakiilka gaarka ah ee carruurta noqonaya waxaa magacaaba dowladda, wuxuuna madax u noqdaa hay'ad dowli ah oo lagu magacaabo Hay'adda Wakiilka gaarka ah ee carruurta.

Hay'adda wakiilka gaarka ah ee carruurta waxaa ka shaqeeya 25 qof oo ku hawillan xuquuqda carruurta iyo dhallinyarada. Wuxuu barnaa sida qaraarka carruurta uga dhex shaqeeyo bulshada dhxdeeda annagoo soo jeedineynna talooyin ku saabsan sida wax looga beddelayo sharciyada xeerarka Iswiidhen si loo waafqajiyoo qaraarka carruurta. Wakiilka gaarka ah ee carruurtu wuxuu la hadlaa carruurta iyo dhallinyarada iyadoo la baarayo sida xaaladdoodu tahay iyo waxa ay ka qabaan arrimo kala duwan oo iyaga khuseeya. Wakiilka gaarka ah ee carruurtu wuxuu si gaar ah u la hadlaa carruurta aysan xaaladdoodu wanaagsanayn. Aqoonta aan ka soo ururinno nolol-maalmeedka carruurta waxaan u gudbinnaa dadka ka taliya degmooyinka, gobolada iyo hay'adaha.

Wakiilka gaarka ah eecarruurtu wuxuu kaloo xaaladda carruurta iyo dhallinyarada ku wargeliyaa dadka talada dalka haya, baarlamaanka iyo dowladda.

### Wakiilka gaarka ah ee carruurta

Adareeska: Box 22106, 104 22 Stockholm

Adareeska booqashada: Norr Mälarstrand 6

Telefoon: 08-692 29 50

Haddaad tahay qof da'diisu ka yar tahay 18 sano waxaad naga la  
soo xiriiri kartaa telefoonkayaga carruurta oo ah: 020-23 10 10

E-mail: [info@barnombudsmannen.se](mailto:info@barnombudsmannen.se)

Barta internet: [www.barnombudsmannen.se](http://www.barnombudsmannen.se)

